Talyaaniga

# MAXAA XOGTAYDA SHAQSI LOOGU GUDBIYAY EURODAC?

Nooca A

**CODSADAYAASHA ILAALINTA CAALAMIGA AH**



SOMALI

## MAXAAN BUUG-YARAHAN U HELAYAA?

Waxaad codsatay ilaalinta caalamiga ah, taas oo sidoo kale loo yaqaan magangelyo, dalkan.

Buug-yarahan wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xogta ay hay'aduhu kaydin doonaan iyo muddo intee la'eg.

## MAXAAN UGU QASBANAHAY INAAN BIXIYO FARAHAYGA IYO SAWIRKAYGA?

Hay'adaha waddankan waxay qaadi doonaan farahaaga iyo sawirkaaga. Xogtan, oo ay la socoto macluumaadkaaga aqoonsiga iyo macluumaad kale oo muhiim ah, waxaa loo gudbin doonaa keyd wadaagga Yurub ee Eurodac.

Eurodac waxay isku xirtaa qaybaha qaarkood ee dadka aan ahayn muwaadiniinta dalka EU+ iyaga oo la xiriirinaya sadka faraha iyo sawirkooda gaarka ah.

Keydkan waxaa isticmaala dhammaan 31 waddan oo EU+ ah kuwaas oo diyaarin kara xogtaada si ay u helaan macluumaadkaaga. Dalalka EU+ waxaa lagu taxay dhammaadka buug-yarahan.

## WAA MAXAY XEERKA MAAREYNTA QAXOOTIGA IYO SOCDAALKA?



Dalalka EU+ waxay ku heshiiyeen sharci guud oo la yiraahdo Xeerka Maareynta Magangalyada iyo Socdaalka kaas oo gacan ka geysta in la go'aamiyo dalka ay tahay inuu baadho codsiga magangalyo ee qofka. Sharcigani sidoo kale wuxuu u oggolaanayaa waddamada EU+ inay iska caawiyaan haddii waddan uu helo codsiyo badan isku mar.

Waxaa laguu dammaanad qaadayaa in mid ka mid ah dalalka EU+ uu baadho codsigaaga magangalyo, laakiin ma dooran kartid dalka EU+ ee mas'uulka ka noqon doona. Dalka baadhaya codsigaaga waxaa lagu go'aamin doonaa shuruucda Xeerka Maareynta Magangalyada iyo Socdaalka.

Haddii aad u guurto waddan kale oo EU+ adigoon haysan ogolaansho oo farahaaga mar kale la qaado, dhammaan xogtaada ku jirta Eurodac waxaa arki doona hay'adaha waddankaas.

**Adigu waxaad imika joogtaa Talyaaniga kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Awstiriya, Biljam, Bulgariya, Kroasiya, Qubrurs, Jamuriyada Cerchia, Denmark, Estoniya, Finland, Faransis, Jarmal, Giriig, Hungari, Talyaani, Latviya, Litwaniya, Luksemburg, Malta, Nederlandese Holland, Boland, Burtuqaal, Jamhuuriyada Ireland, Rumania, Slovakiya, Sloveniya, Isbania, Iswiiden iyo
- 4 waddan oo kale: Aysiland, Liechtenstein, Norway, Iswisarland.

# MACLUUMAAD NOOCEE AH AYAA LAGU KAYDIYAA EURODAC?



Macluumaadka soo socda mar walba waa la kaydiyaa:

- farahaaga
- sawirka wejigaaga
- dhammaan magacyada aad hadda isticmaasho ama hore u isticmaali jirte
- tarikhda dhalashadada
- meesha aad ku dhalatay
- dhalashadada ama dhalashooyinkaaga
- jinsigaaga
- nuqulo ka mid ah dukumentiyada aqoonsiga ama safarka ee aad isticmaashay, haddii la heli karo, oo ay ku jirto macluumaadka ku saabsan saxnimadooda
- aqoonsiga shaqaalaha qaaday farahaaga iyo sawirkaaga iyo taariikhaha la qaaday oo la gudbiyay xogtaada
- dalka aad ka codsatay magangalyo
- taariikhda codsiga magangalyada.

Macluumaadka soo socda sidoo kale waxaa lagu kaydin karaa Eurodac haddii loo baahdo:

- dalka mas'uulka ka ah baadhista codsigaaga
- haddii lagu raray, dalka EU+ ee laguu raray
- haddii codsigaaga la diiday oo aadan xaq u lahayn inaad joogto dalalka EU+
- haddii codsigaaga lagu tixgeliyay habka xuduudaha oo la diiday ama codsigaaga loo tixgeliyay mid la iska dhaafey
- macluumaadka ku saabsan fiisaha laguu soo saaray dal EU+
- macluumaadka ku saabsan waqtiga aad ka baxday goboloda dalalka EU+
- macluumaadka ku saabsan haddii aad aqbashay soo jeedin aad si iskaa ah ugu laabatid dalkaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad gasho oo aad saxdo macluumaadka khaldan ee lagu kaydiyay Eurodac iyo inaad codsato in xogtaada la tirtiro haddii si sharci-darro ah loo maamulo. Waxaad la xiriiri kartaa kantaroolaha xogta si tan loo sameeyo. Faahfaahinta kantaroolaha xogta waxaa laga heli karaa buugga yar ee cinwaankiisu yahay **'Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato Eurodac'.**

## MUDO INTEE LA EG AYEEY XOGTAYDA SHAKHSIGA AH KU KEEYDSANAAN DOONTA EURODAC?



Macluumaadkaaga waxaa lagu kaydin doonaa 10 sano ka dibna si otomaatig ah ayaa loo tirtiri doonaa.

Haddii aad qaadato jinsiyadda dal EU+ ka hor inta aan mudadaasi dhicin, xogtaada waa la tirtiri doonaa. Haddii xogtaada la tirtiro, tani saameyn kuma yeelan doonto xaaladdaada dalka aad jinsiyadda ka heshay.

## MACLUUMAD KALE MIYAA LAGU KEYDIYAA EURODAC?

Natiijada baaritaanka amnigaaga waa la kaydin doonaa haddii hay'aduhu ogaadaan in laga yaabo inaad:

- heysato hub
- noqoto mid rabshad sameeya
- ku lug yeelato dambiyo argagixiso
- dembi culus ka gashay dal EU+ kale oo lagugu xiri karo dalkaas.

Xaaladahan, waxaa loo tixgelinayaa inaad halis ku tahay amniga gudaha. Tan waxaa lagu kaydin doonaa Eurodac oo ay wehliyaan sababaha lagu cadeeyay ee kor ku xusan.

Haddii dalalka EU+ ay kuu aqoonsadaan inaad halis aheyn, macluumaadkan waa la tirtiri doonaa.

Waxaad xaq u leedahay inaad gasho oo aad saxdo macluumaadka khaldan ee lagu kaydiyay Eurodac iyo inaad codsato in xogtaada la tirtiro haddii si sharci-darro ah loo maamulo. Waxaad la xiriiri kartaa kantaroolaha xogta si tan loo sameeyo. Faahfaahinta kantaroolaha xogta waxaa laga heli karaa buugga yar ee **'Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato Eurodac'.**

# QORAALADAYDA

# QORAALADAYDA

Qoraalkan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas’uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira qoraalka buug-yarahan.

© Hay’adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025